

Waraysiga Barnaamijyada Da'da Iskuulka

Haddii aad heshay Xarun Xanaanada caruurta oo qancisay baahida qoyskiina, talaabada xigta waxay tahay inaad ku tagto booqasho. Waxaa wanaagsan in aad sameeysato balanta waraysiga markii aanay ilmuhu joogin ama aad fiiriso sida ay ilmaha iyo dadka waaweeyni u wada dhaqmayaan.

Jidka lagu radiyo xanaano bixiye ilmaha kuu haya, habkani waa sidii waraysiga shaqo raadinta oo kale. Waxaad eegaysaa boyntiyada muhiimka kuu ah. Waqti u qabso aad ku diyaariso su'aalaha aad weeydiinayso. Meel ku qoro su'aalaha iyo fikradaha ka soo baxa. Waxaa laga yaaba inaad u bahato qof kale oo ku xasuusiya su'aalaha iyo kaala taliya waxa jawaabaha ah ee aad u baahan tahay.

Waxaa laga yaaba inaad u baahan tahay inaad la timaado ninkaada ama qof ka tirsan qoyskaada maalinta booqashada, laakiin isku day inaad keeni ilmaha. Waxaa loo baahan yahay inaad si fiican u dhagaysato, iyadoo aan lagu qashqashaadeynin, waxa xanaano biiyuhu ku leeyahay. Haddii ay maquul tahay, waxa laga yaaba inaad waraysato qofka dhab ahaan heynaya ilmahaada. Hubso inaad wax ka weeydiiso su'aalaha edbinta iyo waxa ay jeceshahay ama aysan ku jeclayn shaqadeeda barnaamijka. Huso inaad si fiican u fiiriso wada dhaqanka caruurta/dadka waaweeyn.

Magaca Xarunta _____ Magaca Maamulaha _____

Maalinta Waraysiga _____

Ilaa iyo muddo intee la eg ayuu barnaamijkani furan yahay?

Meeqa caruura ayaad hada ku haysaaa xaruntan?

Maxay tahay trada kooxda ilmaha ee cunugayga da'diisa? Galaasyadoodu maxay yihiin iyo iskuulada ay caruurtaasi aado?

Sidee caruurta looga keena laguna geeya barnaamijka ilaa iyo iskuulka?

Adiga iyo xanaaneeyayaasha kale ma haysataan shahaadada First Aid, CPR, ama tababarada kale ee qaaska ah?

Waa maxay tababarka macalinka ugu sareeya iyo shaqaaluhu haystaan?

Adiga iyo shaqaalahaadu ma dhigataan waxbarashada xanaanada caruurta oyo tababarada?

Qiyaastii, muddo intee la eg ayay shaqaalaha iyo macalimiintu kula shaqeeynayaan? Meeqa sanandood oo waaya aagnimo ah ayaad heysataa?

Ma haysataa shahaadada ma lisenka loga baahan yahay gobolkaan? Ma arki karaa Lisenkaada?

Ma sameeysaa warbixino ama updates?

Maxay tahay ujeedadaada edbinta? Homework?

Maxay tahay ficilada aad u diyaarisay caruurta ka hor/ka dib iskuulka?

Sidee ku xalinaysaa haddii laba ilmood ay is af garan waayaan?

Maxaad sameynaysaa haddii aad walwal ka qabto koritaanka mid ka mid ah caruurta, edaabta, ama wanaaga mid ka mid ah caruurta?

Ma sameeysaa wax barnaamijyo qaas ah (tusaale ahaan, Dabaasha, waxbarida, casharada musikada)? Maxay tahay lacagtu?

Sidee ku kala saartaa caruurta “iskuulka” iyo “ka hore/ka dib iskuulka” caruurta?

Sidee ula shaqeysaa waalidka ay fikradiisu ka duwan tahay midaada?

Maxay tahay lacagta la iska doonayo? Goorma ayaa lacagta la iska doonayaa? Wax lacaga ma la iska dhimayaa haddii aan keensado labo ama sadax ilmood? Ma waxaan lacagta ku bixinayaa halkaan mise meel kale?

Ma jirtaa doorasho ah inaan part time ku kensado, ama markii aan doono kaliya, ama saacado kaliya? Wax lacaga miyaan bixinayaa haddii aan soo daaho? Haddii ay sidaas tahay, waa meeqa?

Ma waxaan bixinayaa xataa maalmihii aanu ilmahaygu iman xanaanada?

Maxay tahay maalmaha aad u xiraysaan feestooyinka?

Ma leedahay dad kale oo ilmaha haynaya? Goorma ayaa iyaga ilmaha u dhiibtaa?

Maxaa la iga doonayaa inta ka horaysa ee aanu cunigaygu bilaabiin xanaanadan?

Maxay tahay sharciyadaada jirada?

Ma siisaa ilmaha daawada haddii aay fasax leedahay?

Ma leedahay muddo caruurta la qabsato borograamkaada ama maalmo fiirin ah?

Ma soo fiirin karaa meesha ilmahayga lagu heyn doono?

Ma i siin kartaa magacyada sadax qoys oo aan waraysan karo telefoonkooda iyo magacyadooda si aan wax ku weeydiiyo?

Ka dib wareeysiga, fiiri qeybaha muhiimka kuu ah ee wada sheekaysiga u kala saar wixi aad jeceshahay iyo wixii aad necebtahay ee wada hadalkiini, si ay kuu caawiso fikrada kala hormarso sida ay u kala muhiimsan yihiin, kala hadal wixii aad soo aragtay ninkaada ma naagtaada iyo dadka kala ee muhiimka kuu ah, Markii aad ku soo gaba gabaysid doorashadaada hal ama laba. Wac dadkii uu ku siiyeen magacyadooda si aad ku waraysato.